



DAYACTIR iyo

HORUMARIN

ee MJØLNERPARKEN

KU MEELGAARKA AH DIB-U-GURYEYNTA 2020 # 3

WAA MAXAY DIB-U-GURIYEYNTA KU MEELGAARKA AHI.....	bogga 2
HALKEE IYO GOORTEE?.....	bogga 2
MAXAA LA SAMEEYAA MARKA AY TAHAY INAAD GUURTO	bogga 2
SI FIICAN U DARYEEL GURIGAAGA KU MEELGAARKA AH.....	bogga 5
TODDOBO SHAY OO AY TAHAY IN LA XUSUUSTO MARKII LA GUURAYO.....	bogga 5
MAALGELINTA.....	bogga 6
XULASHOYINKA IYO WAXYAABAHA DHEERAADKA AH.....	bogga 7
LA XIRIIR.....	bogga 8

MA WAXAAD U GUUREYSAA SI KU MEEL GAAR AH?

Dadka degan Mjølnerparken waxay go'aansadeen in guryaha oo dhami ay yeeshaan jiko iyo musqul cusub. Suurtagal maaha inaad ku noolaato guri aan lahayn jiko iyo musqul, sidaas darteed waa inaad gurto laba ilaa saddex bilood inta gurigaaga la dayactirayo. Taas macnaheedu waxa weeye in si ku meelgaar ah dib laguugu guryeyn doono.

HALKEE IYO GOORTEE AYAAN SI KU MEELGAAR AH U GUURAYAA?

Gurigaaga ku meelgaarka ahi wuxuu lamid noqon doonaa guriga aad hadda ku nooshahay. Wuxuu ku ooli doonaa Mjølnerparken ama meel kale oo kamid ah Magaalada Copenhagen. Haddii lagu dejiyo guri ka baxsan Mjølnerparken, dabcan waa lagugu soo dhaweynayaa inaad dib ugu laabato Mjølnerparken marka guri la helo.

Saddex bilood kahor inta aanad guurin, waxaad heli doontaa ogeysiis dib-u-dejinta. Ogeysiiska, waxaa lagugu siinayaa guri ku meelgaar ah. Waa inaad saxeexo dalabka oo aad ku celiso BO-VEST, haddii kale dalabku wuu dhacayaa adiguna waxaad mas'uul ka noqon doontaa inaad hesho guri ku meelgaar ah.

Dayactirka guryaha ayaa qabsoomi doona afarta sanno ee soo socda, waxaan dib-u-dejin ugu sameyn doonaa dadka deegaanka si joogto ah.

MAXAA LA SAMEEYAA MARKA AY TAHAY INAAD GUURTO


WAA INAAD XIRATAA GURIGAAGA

Waa inaad alaabtaada ka soo baxdaa gurigaaga iyo keydkaaga laftiisa.

Gurigaaga ku meelgaarka ah wuu madhnaan doonaa, sidaas darteed waxaad u baahan doontaa inaad sii qaadato dhammaan alaabta guriga iyo alaabtaada shakhsiyeed ee aad isleedahay waad u baahan doontaa labada-saddexda bilood ee soo socda.

Haddii lagu siiyo guri ku meelgaar ah oo ka yar kan aad hadda ku nooshahay, waxaad ikhtiyaar u leedahay in qaar kamid ah alaabta gurigaaga lagu keydiyo goobta keydka. Fadlan la soco in qalabka guryaha aan la heli doonin inta lagu jiro xilliga dib-u-guryeynta. La xiriir La Taliyaha Amniga haddii aad rabto xalkan.

Waxaad heli doontaa tilmaamaha dib-u-guurida oo ay weheliso ogeysiiska taariikhda guuritaanka. Waxay sheegaysaa waxyaabo badan oo ay kamid yihiin, in kartoon kasta oo guuritaan uu culeyskiisu noqon karo ugu badnaan 15 kg. Kartoonada guuritaanka, duubka alaabada ilaaliya iyo xabagta ayaa la keeni doonaa guriga laba toddobaad ka hor inta aanad guurin.



DADKA WAAYEELKA AH, KUWA ITAALKA DARAN IYO DADKA NAAFADA AH WAXAY HELI KARAAN CAAWIMAAD GAAR AH OO LAGAGA KAALMEYNAYO XIRXIRIDA

La xiriir BO-VEST ama Kooxda Amniga haddii aad caawimo u baahan tahay.

Waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad bixiso kharashka shirkadda guuritaanka si ay kaaga caawiso xirxirida alaabtaada. Waa inaad toos ula xiriirtaa shirkada guuritaanka si aad ballansato.

Waxaa jiri doona macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xirxirida iyo faahfaahinta macluumaadka xiriirka ee shirkadda guuritaanka wakhti kahor taariikhda guuritaanka.

Koontiidhar ayaa la diyaarin doonaa si aad wax u nadiifin karto.

CAYMISKA ALAABTA GURIGAAGA

Shirkadda guuritaanku waxay leedahay caymis daboolaya dabka, waxyeelada biyaha iyo xatooyada, laakiin waa inaad qaadatid caymiska alaabada guriga ee la rarayo.

Waxaad caawimo ka heli kartaa Kooxda Amniga haddii aad u baahato.

Haddii shirkada guuritaanku ay waxyeello gaadhsiiso alaabtaada inta lagu jiro guuritaanka, shirkadda guuritaanka waxa ku waajib ah inay bixiso magdhow. Waa inaad cadey kartid inay shirkada guuritaanku keentay dhaawaca inta aanad helin magdhow, waana inaad kusoo gudbisaa cabashadaada 14 maalmood gudahood kadib guuritaanka. Haddii uu jiro wax khilaaf ah, waa arrin gaar ah oo u dhexeeya adiga iyo shirkadda guuritaanka.

Haddii shirkadda guuritaanku ay mas'uul ka ahayd xirxirida alaabtaada, waxay dabooli doonaan wixii burburay.

GET HELP FOR
UNDERSTANDING
FROM THE SECURITY TEAM
(TRYGHEDSTEAMET)

FÅ HJÆLP FRA
TRYGHEDSTEAMET

DALBO CAAWINAAD SI AAD U
FAHANTO
KOOXAHA AMMAANKA

الحصول على مساعدة للفهم
من فريق الأمن

MAXAAD LA SAMEEYAA MARKA AY TAHAY INAAD GUURTO - WAY SOCOTAA

QALABKA GAARKA AH EE KU YAALA GURIGA

Haddii aad guriga ku haysato qalab gaar ah oo ay degmadu ansixisay kuna rakibtay, xusuusnow inaad u sheegto shirkadda guuritaanka inay tahay in loo raro gurigaaga cusub. Haddii aad leedahay qaylo-dhaan dhaliye, waxa muhiim ah inaad guuriso taleefankaaga oo aad u sheegto guuristaada [shirkada] daryeelka gurigaaga.

BEDDELIDA CINWAANKA IYO BOOSTADA

Beddelidaada ku meelgaarka ah ee cinwaanka waa in lagu warbixiyaa borger.dk. Waxaad caawimo ka heli kartaa Kooxda Amniga haddii aad u baahato. Kadib waxaad si otomaatik ah ugu heli doontaa boostada cinwaankaaga ku meelgaarka ah.

TV, INTERNET IYO TALEEFANKA LAYNKA AH


Waa inaad guurisa TV-gaaga, taleefankaaga iyo internetkaaga. Waxaad caawimo ka heli kartaa Kooxda Amniga haddii aad u baahato.

Fadlan la socio:

- Inay jiri karaan xalal kale oo TV/Internet ah oo laga heli karo gurigaaga cusub, taas oo ay tahay inaad iska diiwaangeliso.
- Inay waajib tahay inaad joojiso adeegii hore.
- Inay waajib tahay inaad u sheegto guuristaada bixiyaha adeega taleefankaaga.

IIMEYL


Haddii cinwaanka iimeylku uu ku xiriirsan yahay TV-gaaga iyo Bixiyaha internetka, waa inaad isku daydaa inaad kala hadasho in la heli karo xal.



SI FIICAN U DARYEEL GURIGAAGA KU MEELGAARKA AH

Markaad la wareegto guriga ku meelgaarka ah, waa la nadiifiyay, laakiin dib looma cusboonaysiin dhawaan.

Xusuusnow inaad nadiifiso guriga ku meelgaarka ah kahor inta aanad u guurin, ama waa laguu nadiifin kharashkakna waa lagaa qaadi.



TODDOBA

SHAY OO AY TAHAY IN LA XASUUSTO

LIISKA HUBINTA! WAXYAABAHA AY TAHAY IN HORE LOO SII XUSUUSNAADO KAHOR INTAANAD GUURIN:

1. XUSUUSNOW INAAD SAXEEXDO BANDHIGA GURIGA KU MEELGAARKA AH KUNA SOO CELISO BO-VEST.
2. WAA INAAD XIRXIRATAA GURIGAAGA OO AAD ADIGU KEYDSATAA ALAABTAADA.
3. XUSUUSNOW INAAD SHIRKADDA GUURITAANKA LA DEJISID TAARIKHDA GUURITAANKA.
4. DIYAAR NOQO WAQTIGA LAGU BALLAMAY.
5. XUSUUSNOW INAAD GUURITAANKA KU WARBIXISO BORGER.DK.
6. LA XIRIIR SHIRKADDAADA CAYMISKA, TV-GA IYO ADEEGA INTERNETKA.
7. XUSUUSNOW INAAD NADIIFISO GURIGA KU MEELGAARKA AH KAHOR INTA AANAD MAR KALE GUURIN.

SI FIICAN U DARYEEL GURIGA ISKANA
ILAALI KHARASHYADA DHEERAADKA
AH.

MAALGELINTA

KA WARAN BIXINTA LACAGTAYDA KIRADA, ISTICMAALKA IYO DHEEFAHA GURYEYNTA (HADDII AY KHUSEYSO)?

- Waa inaad sii wadaa bixinta lacagtaada kirada, biyaha iyo kuleylinta ee joogtada ah, inta aad ku nooshahay guri ku meelgaar ah.
- Waad haysanaysaa dheeftaada guryeynta (haddii ay khuseyso) inta aad ku nooshahay gurigaaga ku meelgaarka ah.
- Uma baahnid inaad ka bixiso deebaaji guryeyntaada ku meelgaarka ah
- Isticmaalka [adeegyada] waxa ka akhrinaya aqalkaaga iyo gurigaaga ku meelgaarka ah xafiiska hantida kahor ama kadib guuritaankaaga.

KIRADA DAYACTIRKA KADIB


Kirada ayaa la kordhin doonaa kadib marka dayactirka la dhammeeyo. Kiradaadu way kordheysaa ugu badnaan 10% marka loo eego kirada lagaa qaadi jiray waqtigii guuritaanka. Korodhka kirada waxa la bixinayaa oo keliya marka aad u guurto gurigaaga la dayactiray.

Hadafka ayaa ah in Mjølnerparken ay noqoto mid kamid ah meelaha ugu jaban ee lagu noolaado Copenhagen. Tani waa yool aanu gaadhi karno, iyo waxyaabaha kaleba, maxaa yeelay waxaan ka helnay taageero Sanduuqa Dhismaha ee Qaranka iyo Magaalada Copenhagen si dib u habeyn iyo horumarin loogu sameeyo aagga.

Iyada oo ku xidhan xaddiga kulaylka/biyaha kulul ee aad ku isticmaasho gurigaaga, iwm., Waxaad filan kartaa inuu hoos u dhici doono celcelis ahaan DKK 70-100 kr bishii.

Taas macnaheedu waa haddii, tusaale ahaan, aad ku nooshahay guri dabaq ah oo ah 80 sqm, oo dayactirka kadib lacagtiisu tahay 6,348 kr bishii, waxaad ka jari kartaa hoos u dhaca kuleylka la isticmaalo oo ah qiyaastii. 70-100 kr.

Haddii aad hadda qaadato dheefaha guryeynta, dheeftaada guryeynta ayaa waxa lagu dabaqi doonaa kiradaada mustaqbalka.



XULASHOYINKA IYO WAXYAABAHA DHEERAADKA AH

Wakhti aan ka dambeyn seddex toddobaad kadib marka aad hesho ogeysiiskaaga inaad si ku meelgaar ah uga guureyso gurigaaga, waa inaad soo gudbisaa liiska xulashadaada iyo xuquuqdaada dalabka oo saxeexsan.

Halkan waxaa ku yaal guudmarka fursadahaaga marka la eego xulashooyinka iyo waxyaabaha dheeraadka ah. Kulamada lagaga hadlayo xulashooyinka/waxyaabaha dheeraadka ah waxa la qaban doonaa wakhti ka horeeya dayactirka gurigaaga. Haddii aanad xulasho sameyn, xal caadi ah ayaa lagu doori doonaa.

MUSQULAHA





- Musqusha, darbiyada: Waxaad kala dooran kartaa saddex nooc oo kala duwan oo ah marmarka darbiyada ee cadcad.
- Musqusha, sagxada: Waxaad kala dooran kartaa cawlaan cadaati ama madow ah amaba qaab sawir u eeg.

Musqusha, waxa suurtagal ah in la doorto waxyaabahan la iibsano ee ikhtiyaariga ah ee soo socda:

- Tuwaal qalajiye, sinxi uu kabadh ku hoos yaalo, gidaar dhalo ah oo xayndaab u noqda qeybta qubeyska.
- U diyaarinta musqusha ku rakibida dhaqe/qalajiye.
- Kabadhka xaaqinka lagu rido oo gidaarka ku dheggan kuna ag yaala sinxiga.

JIKADA

- Albaabada kabadhka: Waxaad kala dooran kartaa albaabada jikada oo siman midabkooduna yahay cadaan, cawlaan ama buluug cadaati ah.



- Gacanta albaabka: Waxaad kala dooran kartaa gacmo gaagaaban/dhaadheer ama bir kuusan.
- Miiska dushiisa: Waxaad kala dooran kartaa miisas dushoodu leedahay dhajis midabkoodu tahay cawlaan cadaati/madow ah.
- Marmarka derbiga oo lagu dhajiyo miiska shaqada dushiisa: Waxaad kala dooran kartaa laba nooc oo kala ah marmar cad ama derbi rinji leh oo leh bir aan daxalaysamin oo lagu daba dhajiyo kariyaha.

Jikada, waxa suurtagal ah in la doorto waxyaabahan la iibsano ee ikhtiyaariga ah ee soo socda:

- Kabadhada derbiga oo dheeri ah, khaanadaha lasoo jiido, khaanadaha lagu rido weelka halkii laga adeegsan lahaa kabadh hoose, rinjiga jikada.
- Albaabada kabadhada kijinka oo leh dahaadh loox u eeg

LA XIRIIR

GURIGA MUUNADA AH waxa lagu soo daawan karaan ballan wuxuuna ku yaalaa Mjølnerparken 22, st. tv. Warqad u dir [mjølnerparken@bo-vest.dk](mailto:mjolnerparken@bo-vest.dk) haddii aad jeclaan lahayd inaad aragto.

LA XIRIIR KOOXDA GURYEYNTA EE BO-VEST, oo maamusha kireynta guryaha Bo-Vita, tel. 8818 0880 ama iimeyl ahaan: [mjølnerparken@bo-vest.dk](mailto:mjolnerparken@bo-vest.dk). (Furan maalin kasta 10:00 ilaa 14:00. Khamiista ilaa 17.00).

Waxa kale oo lagaa caawin karaa su'aalaha ku saabsan dib-u-guryeyntaada/guurintaada ku meelgaarka ah ama joogtada, dayactirka Mjølnerparken iyo waxyaabo badan oo dheeraad ah adigoo la xiriiraya **LA TALYAHA AMNIGA SØREN WIBORG** tel. 6190 0537, iimeyl: sor@bo-vest.dk.

Had iyo jeerna waa lagugu soo dhaweynayaa inaad la hadasho shaqaale ka socda **QORSHAHA GUUD**

EE GURYEYNTA BULSHADA ee Hothers Plads 2 oo laga helo Café Nora. Saacadaha xafiiska: Isniin ilaa Khamiis inta u dhaxeysa 10:00 ilaa 14:00, ama taleefanka 6190 0641.

Bo-Vita managed by BO-VEST
Stationsparken 37
DK-2600 Glostrup

Tel. 8818 0880
Fax 8818 0881

www.bo-vest.dk
bo-vest@bo-vest.dk

GET HELP FOR
UNDERSTANDING
FROM THE SECURITY TEAM
(TRYGHEDSTEAMET)

FÅ HJÆLP FRA
TRYGHEDSTEAMET

DALBO CAAWINAAD SI AAD U
FAHANTO
KOOXAHA AMMAANKA

الحصول على مساعدة للفهم
من فريق الأمن

